ISMAAMULKA SAN DIEGO



BARNAAMIJKA ILAALINTA WARAHA BIYAHA



# **Kormeer Ganacsigaaga**

Barnaamijka ***Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego*** ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, mijaroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. ***Tilmaamahaan kormeerka ganacsigaaga gaariyaasha ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.***

waan **difaaci karnaa** marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayao keliya **dhawr talaabo.**

## Liiska Hubinta Kormeerka

- Kormeer ku samee aagaga gudaha iyo banaanka ganacsigaaga ugu yaraan hal sano kadibna raadi meelaha u baahan dayactirka.
- Meesha ka saar tuubooyin kasta oo sharci daro ah oo ku xiran nidaamka daadka ama biyo qabanaaya.
- Xaqiiji in dhammaan waxyaabaha wasaqda aan ahayn biyaha daadka lagu qabto goobta kadibna dib loo warshadeeyo, loo adeegsado, ama si sax ah loogu daro qashinka si waafaqsan dhammaan sharciyada iyo xeerarka quseeya.
- Kormeer dhulka si joogto ah si aad uga fiiriso qashin iyo waxyaabo daatay oo u baahan in degdeg loo nadiifiyo.
- Kormeer aagaga baakinka iyo aagaga shidaalka si goos-goos ah si aad uga eego waxyaabo ku aruuray sida saliida, shidaalka, ama olyada.
- Si goos-goos ah u kormeer, u nadiifi, una ilaali dusha sare ee saqafka dhismahaaga.
- Si joogto ah u kormeer una ilaali dhammaan xakamaynada biyaha daadka ee dhismaha sida balida biyaha qabta, kala miireyaasha saliida/biyaha, kala soocaha,gidaarada, ama aaladaha kale ee xakamaynta biyaha

*tilmaamo dheeraad ah >>>*

***Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.***








## Qorista iyo Haynta Diiwaanka

- Qor talaabo kasta oo dayactir ah oo la sameeyay.
- Qor dhammaan waxyaabaha aad u jeedo; qiimee waxtarka iyo xaalada dhammaan BMP-yada.
- Xaqiiji in Qorshahaaga Kahortaga Wasaqda Daadka (SWPPP) iyo dukumiintiyada kale ee la xariira ay yihiin kuwo shaqaynaaya iyo in dhammaan qaybuhu sax yihiin si qumanna loo dhaqan gasho.
- Hayso dhammaan dukumiintiyada la xariira biyaha daadka oo loo heli karo dib u eegista kormeerka, ayna ku jirana diiwaannada tababarka, SWPPP, Ogeysiiska Doonista ama Diiwaannada Kormeerka/Sanbal bixinta.

! **Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Ilaalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO).** ***Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.***

waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha
ayadoo la qaadayao keliya
dhawr talaabo.

# Waad ku mahadsan tahay

**inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.**

***Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.***